Updated Oct. 3, 2023

# Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo ee La Xiriira Leesanka Darawalnimada ee Dhammaan Dadweynaha

## Goorma ayaa Leesanka Darawalnimada ee Dhammaan (DL for All) bilaaban doonaa?

- Dhammaan dadka ku nool Minnesota waxay bilaabi karaan inay codsadaan shati darawalnimo ee hoos yimaada sharciga cusub ee DL for All laga bilaabo 1da Oktoobar. Sharcigan wuxuu ogolaanayaa dadka soo galootiga ah ee aan heysan sharci degenannsho joogta ah inay helaan shati darawalnimo ama kaar aqoonsi oo Minnesota ah.

## Goorma ayaan ballan u sameysan karaa codsiga leesanka darawalnimada ama kaarka aqoonsiga haddii aanan heysan waraaqaha socdaalka?

- Laga bilaabo Sebtember 2, dadka deggan Minnesota waxay sameysan karaan ballan oo ku aaddan 1 Oktoobar ama wixii ka dambeeya. Jadwal samaynta ballamaha online-ka ah ayaa laga heli karaa goobaha Adeegyada Darawalnimada iyo Gawaarida (DVS) ee ku yaalla drive.mn.gov, qeybteeda Ballamada".

## Dokumenti noocee ah ayaan u baahanahay inaan keeno? Ma keeni karaa dukumenti ku qoran luqad kale?

- Waa inaad keentaa laba dukumenti oo ay ku qoran yihii magacaaga oo dhammeystiran iyo taariikhda dhalashadaada. Dukumenti kasta oo ku qoran luqad aan Ingiriis ahayn waa inuu la socdaa tarjumaad la ogol yahay. Dukumentiyada loo baahan yahay ee DL for All laga bilaabo Oktoobar 1 waxaa lagu taxay bogga DL for All ee ku yaalla drive.mn.gov. Guji “DL FOR ALL” ee ku yaalla geeska bidix kore.

## Yaan siin karaa lacagta la xiriirta caawinta ama habeynta codsiyada, ballamaha, shatiyada ama aqoonsiyada?

- Gobolka Minnesota ayaa sharci ahaan dejiyey kharashaadka. DVS oo Kaliya ayaa loo ogolyahay inay ku dalacdo kharashaadka leesanka darawalnimo ama aqoonsiga. Ka digtoonow khiyaano ama dambiilayaal — gaar ahaan kuwa internet-ka. Kharashaadka saxda ah iyo goobaha laga helo waxaad ka heli kartaa drive.mn.gov.

## Ma keensan karaa turjubaan markaa galayo imtixaanka leesanka xirfadda darawalnimada (wadada)?

- Turjubaan wuxuu kulmi karaa qofka imtixaanka galaya iyo imtixaan qaadaha DVS ka hor iyo ka dib imtixaanka xirfadda darawalnimada (imtixaanka wadada). Sababo la xiriira arrimaha badbaadada ee inta la wadayo, xeerarka Minnesota ma ogola cid kale in gaaro saarnaado marka laga reebo darawalka imtixaanka galaya iyo shaqaalaha imtixaanka qaadaya.

## Waa maxay faa'iidooyinka ogolaanshaha qof walba, iyadoon loo eegin dhalashada jinsigiisa, uu helo leesanka darawalnimada ama kaarka aqoonsiga ee Minnesota?

- Ujeedada sharciga DL for All waa in la abuuro waddooyin iyo bulshooyin ammaan ah.
- Darawalada waxaa lagu tijaabiyaa barashada sharciyada waddooyinka iyo sida gawaaridda si badbaado leh loo wado.
- Darawalada haysta aqoonsi waxay ubadan tahay inay ku sugnaadaan goobta shilka ka dhacay si ay u caawiyaan booliska/EMT ama ukala badashaan macluumaadka caymiska.
- Booliska waxay awoodi doonaan inay si sax ah u hubiyaan aqoonsiga iyo diiwaanada gaadiidka/leesanka ee dadka goobta ku sugan.
- Sharcigan wuxuu u oggolaanayaa dadka sharci la'aanta ah ee shaqo iyo iskuul u socda inay helaan leesanka darawalnimada si ay u caddeeyaan inay darawallo badbaado leh yihiin oo ay u qalmaan caymiska baabuurta.
- Heerka qarash caymiska ayaa laga yaabaa inuu hoos u dhaco haddii ay yaraadaan kharashyada ku baxa darawalada aan caymiska lahayn.

## Ma u baahanahay inaan marka hore helo kaarka aqoonsiga, ka dibna ogolaansho, ka dibna leesanka darawalnimada?

- Maya. Kaarka aqoonsiga waxaa loo isticmaalaa oo kaliya ujeeddooyinka aqoonsiga. Kaarka aqoonsiga malaha xadid da'a ah. Ogolaansho (Permit) waxaa loola jeedaa in qofka uu qaatay imtixaan aqoon ah laakiin weli baranayo sida loo wado baabuur. Waxa jira sharuudo ku saabsan darawalada ogolaanshaha (Permit) haysta, oo ay ku jirto in ay la socdaan qof haysta leesenka darawalnimo marka ay wadaan baabuur. Leesanka darawalnimada waxaa la qaataa marka lagu guuleysto imtixaan aqooneed (qoran) iyo imtixaan xirfadeed (wadida waddooyinka)..

## Imtixaanka qoraalka luuqadee ayuu lagu heli karaa?

- Goobaha DVS iyo goobaha ay la shaqeyso, Waxaa la heli karaa luqadahan soo socda: Ingiriisi, Isbaanish, Hmong, Fiyatnaamiis, Soomaali, Luqadda Calaamadaha Ameerikaanka, Ruushka iyo Karen.

## Soogalootigu ma inay ka walwalaan baa musaafurin, ama ku lug lahaanshaha sharci fulinta haddii ay helaan shati ama booqdaan DVS?

- Maya. Aqoonsiga kaarka waxaa loogu talagalay dhammaan soogalootiga, oo ay ku jiraan qaxootiga, ardayda iyo shaqaalaha fiiso shaqo ku jooga. Leesanka caadiga ah ee darawalnimada ama aqoonsiga waa isku wadama qof aan sharci ku joogin iyo kan sharci joogaba. Ma jiri doono hab leesanka caadiga ah ay sharci fulinta kaga aqoonsadaa xaaladda sharcigaaga deganaasha. Sharciga DL for All wuxuu si cad u sheegayaa in DVS aysan la wadaagi doonin hay'adaha fulinta sharciyada macluumaadka ku saabsan dhalashada ama xaaladda socdaalka, haddii aysan maxkamad amar ku bixin.

## Dadka ma is diiwaangelin karaan oo ma codeyn karaan iyagoo istic maalaya DL For All leesenka ay ku qaateen?

- Leesanka darawalnimada ee dhammaan ma beddelo shuruudaha diiwaangelinta codbixinta. Waa inaad buuxisaa dhammaan shuruudaha diwaangeli lagu codeeyo oo ay ku jiraan halkan . Sida uu dhigayo sharciga hadda jira, waa dembi culus haddii aad codeyso adigoon aadan xaq u lahayn inaad codeyso.

## Haddii dukumentigeyga joogitaanka kumeelgaarka ahi uu dhacayo Oktoobar 1, 2023 ama wixii ka dambeeya, ma u baahanahay inaan soo gudbiyo dukumenti cusub si aan dib ugu cusboonaysiiyo leesanka darawalnimada ama aqoonsiga Minnesota?

- Maya. Laga bilaabo Oktoobar 1, sharciga DL for All ayaa dhaqan galayaa, mana loo baahnaan doono in la keeno dukumentiyada joogitaanka kumeelgaarka ah si dib loogu cusboonaysiiyo leesanka caadiga ah ee Minnesota. Kaliya haddii aad leedahay IDga Weyn (REAL ID) ama aad rabto inaad dalbato mid, ayaad markaad codsaneyso ayaad u baahan doontaa inaad keento dukumentiga joogitaanka kumeelgaarka ah.

## Maxaa dhacaya haddii aanan rabin inaan siiyo DVS lambarkeyga Bulshada (Social Security Number)?

- Sharciga federaalka ayaa ku waajibinaya in DVS ay hesho lambarka Bulshada ee dadka xaqa u leh inay haystaan lambarkan.

## Sharciga DL for All ma ka dhigi doonaa dadka aan sharciyeysneyn kuwo sharci ah? Ma tahay waddo qarsoodi ah oo dhalasho lagu bixiyo?

- Maya. Aqoonsiga Minnesota ama leesanka darawalnimada looma tixgelinayo caddayn dhalasho, mana ahaan doono mid sidaas lagu tixgeliyo marka sharciga DL for All la hirgeliyo 1da Oktoobar. Sharcigu wuxuu dadka deggan Minnesota u oggolaanayaa inay helaan aqoonsi iyagoo bixiya hal dukumenti asal ah iyo mid labaad (ama labo dukumenti oo asal ah). Sharciga DL for All wuxuu cusboonaysiiyey shuruudaha dukumentiyada asaliga ah iyo kuwa labaad iyadoo meesha laga saaray shuruudaha caddaynta deganaahsha joogitaanka sharciyeysan.

## Ilaa intee buu leesanka darawalnimada cusub ee sharciga cusub lagu qaatay sahqeynayaa?

- Wareegga cusboonaysiinta leesanka darawalnimada caadiga ah waa afarti sannaba mar. Aqoonsiga caadiga ah wuxuu ku kala duwanaanayaa da'da qofka.

## Ma inaan sugayaa baa 1da Oktoobar haddii aan haysto xaaladda sharciyeed ee "Parole"?

- Haddii laguu oggolaaday inaad soo gasho Mareykanka, aad leedahay xaalad joogitaan sharciyeysan, oo aad haysato dukumenti asal ah (kuwa xaaladdan ku jira badanaa waxay haystaan baasaboorka dibadda iyo **I-94** oo muujinaya "Parole" iyo taariikhda uu dhacayo), uma baahnid inaad sugtid. Dukumentiyada hadda loo oggol yahay (**DL for All** la hirgeliyo) waxaa laga heli karaa [halkan.]

## Haddii aanan sharciyeysnayn oo aan leeyahay leesanka darawalnimada oo dhawaan dhacay, DVS hadda ma ii cusboonaysiin karaa?

- Haddii qofka aan sharciyeysneyn hadda, **DVS** way ka mamnuuc tahay inay bixiso leesan darawalnimo, ogolaansho, ama aqoonsi. Tani 1da Oktoobar way isbedeli doontaa. Dadka xaaladdan ku jira waa inay isku diyaariyaan 1da Oktoobar si ay u helaan leesankooda.

## Muddo intee le'eg ayaan ku wadi karaa Minnesota anigoo wata leesanka darawalnimada gobol kale ama waddan kale?

- Markaad noqoto qof deggan Minnesota, waxaad heysataa 30 maalmood oo aad ku bedesho leesanka darawalnimadaada Minnesota.

## Haddii aan isticmaalo Lambarka Aqoonsiga Cashuur-bixiyaha Shakhsiyeed (ITIN), mid khaldan, mid been abuur ah, ama lambarka Bulshada ee qof kale codsi, aqoonsi, ama leesan, sideen uga saaraa

- Jawaabta fudud waa inaad sugto ilaa Oktoobar 1, ka dibna booqo xafiiska DVS oo wata dukumentiyadaada aasaasiga ah iyo kuwa sare. Waqtiga aad codsanayso leesanka ama aqoonsiga, haddii shaqaalaha DVS ay ku weydiiyaan waxa uu yahay lambarka Bulshada (Social Security Number), u sheeg inaadan haysan. Shaqaalaha ayaa markaa ku weydiin doona inaad soo bandhigto dukumentiyadaada si loo geliyo nidaamka. Ha gelin ITIN-kaaga marka shaqaalaha ay ku weydiiyaan lambarka Bulshada, sababtoo ah tani waxay keeni doontaa qalad nidaamka oo kaa hor istaagi doona inaad codsato..

## Haddii aan horay u isticmaalay xog kale oo aan tayda ahayn si aan u helo leesan darawalnimo, maxaan sameeyaa?

- U sheeg shaqaalaha **DVS** marka aad codsanayso si diiwaanada loo mideeyo. Fadlan soo gudbi leesan darawalnimo kasta ama kaar aqoonsi oo aan sax ahayn oo aad haysato shaqaalaha DVS. Waxaa lagula talinayaa in dadka xaaladdan ku jira ay booqdaan goob DVS ah si shaqaaluhu ugu dhammeystiraan isku darka diiwaanada hab sax ah.

## Ma qaadan karaa leesan darawalnimo ama aqoonsi iyadoo aan lagu xusin heerka hubinta/taariikhda joogitaanka kumeelgaarka ah?

- Laga bilaabo 1da Oktoobar, leesanka darawalnimada caadiga ah ama aqoonsiga ma xusi doono heerka hubinta ama joogitaanka kumeelgaarka ah. Si kastaba ha ahaatee, leesanka ama aqoonsiga wuxuu sii wadi doonaa inuu ee xagga hore ku muujiyo calaamadda " Maaha mid loogu talagalay Aqoonsiga Federaalka "Not for Federal Identification**"** .

## Sharciga cusub ma abuuri doonaa koox gaar ah oo darawallo ah?

- Maya. Ujeedada sharciga waa in la hubiyo in dhammaan darawalladu ay bartaan sharciyada waddooyinka oo ay si badbaado leh u wadaan baabuur. Darawallo tababaran oo leesan leh oo caymis haysta waxay kordhin doonaan badbaadada bulshada oo dhan.

## Haddii aanan heli karin dhammaan dukumentiyada loo baahan yahay ka dib Oktoobar 1, laakiin aan ku jiro habka helitaankooda, ma dalban karaa leesan ama aqoonsi?

- Qof aan heli karin ama ku jira habka codsashada dukumenti aasaasi ah ama labaad wuxuu codsan karaa habka **DVS Variance Process**. Foomamka kala duwanaanshaha waxaa laga heli karaa [drive.mn.gov](drive.mn.gov)

## Caymis ma loo baahan yahay marka aad codsanayso leesanka darawalnimada?

- Caddaynta caymiska looma baahna marka aad codsanayso leesanka darawalnimada. Si kastaba ha ahaatee, **caddaynta caymiska waa lagama maarmaan marka aad gasho imtixaanka waddooyinka iyo marka aad cusboonaysiiso astaamaha baabuurkaaga**. Fiiro gaar ah: Haddii aad baabuur ku wadeyso gobolka Minnesota, waa inaad leedahay caymis..

## Maxaan sameeyaa marka aan shaaca ka qaadayo magac kale oo aan horay u isticmaalay si aan u helo leesan darawalnimo ama kaar aqoonsi?

- Magacyada kale ee aad isticmaashay waa in lagu soo sheegaa Xarunta Imtixaanka DVS. Wadata dukumentiyadaada aasaasiga ah iyo kuwa labaad ee shaqaalaha DVS dib u eegaan, iyo sidoo kale leesanka ama kaarka aqoonsiga ee magaca kale. Sii shaqaalaha DVS dukumentiyadaada iyo macluumaadka aad ka haysato magacyada hore ee la isticmaalay. DVS waxay isku dari doontaa diiwaanada si loo helo hal diiwaan oo keliya qofkiiba. Hal diiwaan qofkiiba wuxuu naga caawinayaa inaan hubinno saxnaanta nidaamka kaydinta xogta.

## Ma u baahanahay leesanka darawalnimada Minnesota haddii aan si ku meel gaar ah uga shaqeeyo beeraha oo aan u kala gooyo beero, laakiin aanan qorsheynin inaan si joogto ah ugu noolaado Minnesota?

- Maya. Haddii aad si sharci ah ugu waddo leesanka gobolkaaga ama waddankaaga oo aad had iyo jeer sidato marka aad wadid, waxaad baabuur ama cagaf u kala wadi kartaa beero iyada oo aan loo baahnayn leesanka Minnesota. Tani waxay khusaysaa oo kaliya haddii aadan qorsheynin inaad si joogto ah ugu noolaato Minnesota.

## Maxay yihiin siyaabaha kala duwan ee lagu waayi karo xuquuqda wadista?

- Sharciyada Minnesota waxay qeexayaan dhowr heer oo qof darawal ah uu ku waayi karo xuquuqdiisa wadista:
  - Hakinta: Waa joojinta ku meel gaar ah ee xuquuqda wadista.
  - Ka noqosho: Waa ka noqoshada dhammaystiran ee xuquuqda wadista.
  - Burin: Waa tirtirida xuquuqda wadista ay sameyso DVS.
  - Burin iyo diidmo: Waa ka noqoshada xuquuqda wadista sabab la xiriirta ficillo la xiriira aalkolo ama daroogo.
  - U-qalmi la'aan: Waa ka noqoshada xuquuqda darawalnimada ganacsiga ee DVS.
  - Sharciyada buuxa iyo qeexitaannada waxaa laga heli karaa Xeerarka Minnesota 7409.0100 iyo 7503.0100..

## Wax su'aalo dheeraad ah ma qabtaa?

- Booqo drive.mn.gov oo guji badhanka HELP ee ku yaalla bogga geeskiisa hoose ee midigta. Waxaad su'aalahaaga ku weydiin kartaa afafka Ingiriis, Soomaali, Isbaanish, iyo Hmong.